

Ma ku soo mareen?

Way adag tahay rugta (goobta) daryeelka caafimaadka

Garaabadaydu waxay deggan yahiin tahay meel aad iiga fog

Bacaha raashinku waa kugu culus yihiin inaad qaado kaligaa

Way adag tahay in maamullada dawlaga iyo shirkadaha lala xiriiro

Waxaan u hiloobay (xiisay) carruurta aan awoowaha/ ayeeyada u ahay

Cidlo ayaan maalin kasta dareemayaa

Halkan ayaa caawimaad iyo talo laga helayaa →



Caawimo nolol maalmeedkaaga sahli kara

Mararka qaarkood waxaa dhacda inay wakhtigu, lacagtu ama tamarta jirku kugu filnaan waayaan. Mararka qaarkood waxaa dhacda inay masaafadu dheer tahay, hilowguna (xiisuhuna) weyn yahay. Waxaa adkaan karta in la helo warbixin muhiim ah ama caawino sax ah.

Nololmaalmeedku si kala duwan ayuu ugu shaqeeya dadka kala duwan – mararka qaarkoodna xaaladda nololsha ayaa is beddesha. Marar badan ayaa dhacda inaan helno habab inoo gaar ah oo aan caqabadaha xal u helno. Hase ahaatee waxaa iyana suurto gal ah in la adeegsado xal iyo taakulooyin jira.

Uma baahnid inaad barato wax kasta oo dijitaal ah ee waa inaad uun heli karto waxyaalaha adiga nololmaalmeedkaaga gaar ahaaneed kuu sahli kara.

Halkaan waxaa ku yaal dhowr tusaale oo ka mid ah sida ay adeegyada dijitaalku maalin walba malaayiin dad ah nololmaalmeedka ugu sahlaan:

**Waxaad tahay qofka
158-aad ee safka ku jira!
Ballan ka qabso Internetka
oo sidaas ayaad safaf
telefoon uga maarmeysaa.**

**Badi kulamada qaraabada
iyo asxaabta kaa fog. Adinkoo
dhowr ah ayaad video ku
wada hadli kartaan.**

**Ka maaran bacaha culus ee
raashinka iyo jaranjarooyinka
dhaadheer adigoo Internetka
cuntada ka dalbada.**

**Elimeel iyo farriimo ayaad
qofka aad dooneyso iyo
xilliga adiga kugu habboon
kula xiriiri kartaa.**

**Fiidiyow ayaad carruurta
aad awoowaha/ayeeyada u
tahay kana arki kartaa, kalana
sheekeysan kartaa.**

**E-aqoonsi (Bank ID)
ayaad daawaayinkaaga
laguu soo qorey ku
cusbooneysiisan kartaa.**

**Dalbo cunto makhaayadeed
oo kulul oo diyaarsan in
guriga laguugu keeno.**

**Dhammaan maammullada
dawlaga iyo shirkadaha waxaad
ka heleysaa Internetka. Halkaas
ayaad kala xiriireysaa oo su'aalo
badan jawaabo u heleysaa.**

Uma baahnid inaad wax kasta barato

Si aad internetka iyo adeegyada dijitaalka u isticmaashid waxaad xoogga saari kartaa heerka adiga kugu habboon. Halkaan waxaa ku yaal waxa aad heerarka kala duwan ugu baahan tahay:

Heerka 1-aad: Isticmaalka internetka iyo adeegyada dijitaalka ee aan diiwaangelinta u baahnayn



Kombiyuutar, tablet ama telefoonka gacanta oo internet laga geli karo.



Fursadda qadka internetka lagu xirto (oo loo yaqaan wifi ama surfing). Rukumasho (macmiil) adiga kuu gaar ah ayaad u heli kartaa guriga, telefoonka gacanta ama tabletka. Waxaad iyana lacag la'aan internetka kaga geli kartaa maktabadaha iyo goobo kale oo badan oo dadweynaha u furan.

Heerka 2-aad: Isticmaalka adeegyada dijitaalka ee u baahan diiwaangelin ama barnaamijyo gaar ah



E-aqoonsi – aqoonsi elektroonig ah oo id-kaarka la mid ah

Si aqoonsigaaga loo sugo marka aad isticmaalayso qaar ka mid ah adeegyada dijitaalka ah waxaad u baahan tahay e-aqoonsi. Waxaa jira saddex kala duwan oo aad kala dooran karto:

- BankID oo aad bangigaaga ka dalbanayso
- Freja eID Plus oo wakiillada ATG laga furan karo
- AB Svenska Pass oo aad Hay'adda canshuuraha ka codsanayso



Koontada E-boosto – oo u shaqeeya sida sanduuqa boostada

Haddaad leedahay koontada e-boosto kuu gaar ah waxaad tusaale ahaan diri kartaa oo guddoomi (heli) kartaa warqado, masawirro iyo aflaam; warbixinno ayaad iyana kaga guddoomi kartaa maamuulada dawlaga iyo shirkadaha. Koontada e-boosto ayaa looga baahan yahay adeegyo badan oo dijitaal ah.



Abab iyo barnaamijyo – hawlaha ayay sahli karaan waxayna ku siin karaan adeeg wanaagsan

Mararka qaarkood si aad sida ugu wanaagsan adeeg u isticmaasho, waxaa loo baahan yahay in abab gaar ah ama barnaamijyo la soo dejisto oo lagu kaydiyo kombiyuutarkaaga, tabletkaaga ama telefoonkaaga gacanta. Qaar badan ayaa bilaash ah.

Rog bogga si aad u hesho talo ku saabsan meesha aad caawinaad iyo warbixin ka heli karto →



Tag maktabadda

Maktabadaha Iswiidhan badidoodu dadka oo dhan ayay u furan yihiin oo taageero iyo caawino ayaa laga helaa.

Maktabado badan ayaa dadaal gaar ah sameeya si ay u taakuleeyaan dadka u yimaada ee aan caadada u lahayn isticmaalka farsamada dijitaalka ah, tusaale ahaan iyagoo abaabula koorsooyin bilaash ah, kulamo warbixineed iyo taablet-amaahin.

Maktabadda waxaa lagaaga caawin karaa inaad:

- isticmaasho kombiyuutarrada iyo internetka maktabadda (taas oo gebi ahaan bilaash ah)
- warbixin iyo waxa kale ee aad xiisaynayso ka daabacato (inaad lacag yar bixiso ayaa dhici karta)
- ka qayb gasho kulamo iyo waxqabadyo halkaas oo uu qof kaa tusayo sida internetka loo isticmaalo iyo halka laga billaabo barashada adeegyada dijitaalka
- la kulanto dad kale oo ay iyagana internetka iyo adeegyada dijitaalku ku cusub yihiin



Talo!

Cinwaanka boggaan internetka maktabadda la tag: pts.se/digitalstart

Waxay kaa caawini karaan inay boggaas internetka kuu soo saaraan oo warbixinta ku qoran oo warqad ah kuu daabacaan. Websaydhku wuxuu leeyahay hageyaal wanaagsan iyo tilmaamo lagugu taageerayo sida tusaale ahaan:

- Billow qad wadahalal fiidiyow ah
- Internetka ka iibso raashin iyo daawo
- Furo akoon e-boosto ah
- Macluumaad ku saabsan daryeelka iyo caafimaadka ka raadso 1177 Hagaha daryeelka
- Warbixin ka hel bogagga internetka ee hay'addaha dawliga ah
- Tiedonetsintä viranomaisten verkkosivuilta



La xiriir degmadaada (kommunkaaga)

Degmadaada ayaa adiga mawaadin ahaan kaa mas'uul ah oo ay tahay inay nolol-wanaagaaga ka shaqayso. Degmada ayay tahay inay hubsato inaad heleyso taagerada iyo adeegga aad u baahan tahay si nololmaalmeedka uu kuugu hagaago.

Degmooyin badan ayaa dadaal gaar ah sameeya si qof kasta uu u adeegsado adeegyada dijitaalka ah ee nololmaalmeedka u sahlaya. Wac degmada waaxdeeda xiriirinta ama booqo xarunteeda oo weydii nooca taageero ee laga heli karo halka aad adigu deggan tahay.

Tusaale ahaan, waxaad weydiin kartaa:

- Miyaad leedihiin IT-yahan (qof IT yaqaan) tababare dijitaal ama adeeg la mid ah oo i caawini kara?
- Taablet ma la idin ka amaahan karaa?
- Ma leedihiin wax waxbarasho ah ama wax waxqabadyo ah ee ay idin ka heli karaan dadka ay farsamada dijitaalku ku cusub tahay?
- Ma leedihiin DigidelCenter? Ama meel kale aan kula kulmi karo dad dadka caawiya oo uga jawaaba su'aalaha ku saabsan qalabka iyo adeegyada dijitaalka ah.
- Ma qabanqaabisaan isu imaatin aan kula kulmi karo dad kale ee ay farsamada dijitaalku ku cusub tahay?





Caawino ka raadso qof aad garanayso

Ma jiraan dad kuu dhow oo wax ku tusi kara, wax kuu macnayn kara oo ku caawini kara? Laga yaabee qof qaraabo ah, saaxiib, deris ama qof kale oo aad og tahay inuu farsamada dijitaalka ku wanaagsan yahay.

Hubso inaad qofkaas kalsooni ku qabi karto oo cidna ha iska siin lambar sireedyada muhiimka ah iyo xogtaada gaarka ah.

Ha ka baqin inaad dadka caawino weydiisato. Dad badan ayaa jecel inay wax caawiyaan.

Waxyaalahaan ayaa ka mid ah wuxuu qof kugu caawini karo:

- Inuu ku tuso sida internetka iyo adeegyada dijitaalka ay u shaqeeyaan
- Inuu kaa caawiyo sida aad ku heli lahayd kombiyuutar, tablet ama telefoon gacan oo casri ah
- Inuu kaa caawiyo inaad qad internet hesho
- Inuu kaa caawiyo sida aad ku heli lahayd akoon e-boosto, barnaamijyo iyo abab
- Inuu kuu sharaxo micnaha ereyada kala duwan
- Inuu kuu daabaco warbixin, hageyaal iyo macluumaad aqoon kororsi ah

Daabac hageyaal iyo tilmaamo oo si deggan u akhriso:

Hal webbsaydh ayaan ku soo ururinnay hagayaal wanaagsan, tilmaamo iyo talooyin oo warqad lagu daabici karo. Waxaad dooran kartaa waxa aad dooneyso inaad daabacato, dabadeedna intaad si deggan u fariisato ayaad akhrisan kartaa oo rogroggi kartaa. Adinka oo wadajira isla eega webbsaydhka pts.se/digitalstart.





La xiriir hay'adaha taageerada laga helo

Hay'ado iyo ururro badan ayaa laga helaa taageero, waxqabadyo iyo warbixinno loogu talagalay dadka ay farsamada dijitaalku ku cusub tahay. Tusaale ahaan iyaga oo abaabula fursado waxbarasho, kulamo iyo inay su'aalo ka jawaabaan. Qaar badan ayaa bilaash ah. Halkaan ayay ku yaalliin dhowr hay'adahaas ka mid ah:

Xafiisyada u adeegga bulshada

Dhowr xafiis adeeg oo dalka ku baahsan oo aad booqan karto ayay dawladdu leedahay. Halkaas waxaad ka heli kartaa caawimaad ah isticmaalka adeegyada elektaroonigga iyo sidoo kale talo, tusaale iyo warbixin oo ay ku siiyaan dhowr ka mid ah hay'adaha dawlaga ee dalka. Bogga internetka: statenssc.se/besokservicekontor

Adeegga telefoonka ee hay'adda Hallå konsument

Adeeg telefoon oo bilaash ah oo dadweynaha uga jawaaba su'aalo ku saabsan iibsiga badeecadaha iyo adeegyada, tusaale ahaan telefoonno gacan, kombiyuutarro iyo rukumasho (macmilasho). Waxay iyana kaaga warrami karaan xeerarka jira markaad internetka wax ka iibsaneysid. Telefoon: 0771-525 525, bogga internetka: hallakonsument.se

Ururro waxbarasho

Waxaa jira toban urur waxbarasho oo kala duwan oo koorsooyin iyo waxbarashooyin meelo kala duwan oo Iswiidhan ka mid ah ka bixiya. Wac oo weydii waxa loo hayo dadka ay farsamada dijitaalku ku cusub tahay ee deggan halka aad ku nooshahay. Bogga internetka ee ay ku yaalliin warbixinno ku saabsan ururradaas kala duwan: studieforbunden.se/om-oss

ABF, Xiriirka guud ee waxbarashada shaqaalaha
Telefoon: 08-613 50 00

Nykterhetsrörelsens Bildningsverksamhet
Telefoon: 08-672 61 00

Folkuniversitetet
Telefoon: 08-679 29 50

Ururka waxbarashada Sensus
Telefoon: 08-615 57 00

Ururka waxabarashada Ibn Rushd
Telefoon: 08-562 449 00

Ururka waxbarashada Bilda
Telefoon: 08-727 17 10

Kulturens Bildningsverksamhet
Telefoon: 08-470 24 45

Ururka waxbarashada Vuxenskolan
Telefoon: 08-587 686 00

Medborgarskolan
Telefoon: 010-157 57 57

Studieförbundet
Telefoon: 08-545 707 00

Taageero gaar ah oo loogu talagalay waayeelka

Waxaa jira ururro iyo hay'ado si gaar ah u caawiya waayeelka raba inay bartaan adeegsiga farsamada dijitaalka ah.

SeniorNet Sweden
Urur aan macaash doon ahayn oo leh naadiyo maxalli ah halkaas oo ay wayeel waayeel kale ku baraan isticmaalka farsamada dijitaalka ah.
Telefoon: 076 027 27 17
Bogga internetka: seniornet.se

SPF Seniorerna
Telefoon: 08-701 67 00
Bogga internetka: spfseniorerna.se

SKPF Seniorerna
Telefoon: 010-222 81 00
Bogga internetka: skpf.se

Xiriirka guud ee hawlgabka Iswiidhan, PRO
Telefoon: 08-692 32 50
Bogga internetka: pro.se

Digitalhjälpen (Caawinta dhijitaalka ah) – dadaal-warbixineedka Wakaaladda Boostada iyo Isgaarsiinta Iswiidhan

Qoraalkan waxaa soo saaray Wakaaladda Boostada iyo Isgaarsiinta (PTS) wuxuuna qayb ka yahay dadaal-warbixineedka Digitalhjälpen (Caawinta dhijitaalka ah).

Qof walba uma baahna inuu barto wax kasta oo dhijitaal ah. Balse waxaa jira xalal dhijitaal ah oo sahli kara nolol maalmeedka. Digitalhjälpen waxay ku saabsan tahay tusidda dadka dhijitaalku ku cusub yahay sida ay u qaadi karaan tallaabada koowaad iyo meesha ay ka heli karaan caawimo iyo macluumaad dheeraad ah.

Digitalhjälpen (Caawinta dhijitaalka ah) waxay ka kooban tahay afar qaybood:



Bogga internetka oo ay ku urursan yihiin macluumaad, taageero iyo talo loogay dadka dhijitaalku ku cusub yahay.

pts.se/digitalhjalpen



Hagid tallaabo-tallaabo ah oo la daabici karo iyo fiidowyo tilmaamo ah oo ku saabsan adeegyada dhijitaalka ah ee kala duwan, sida wicitaannada fiidiyowga ah ama sida internetka looga iibsado cuntada iyo daawada.

pts.se/digitalstart



Agab taageero gaar u ah shaqaalaha caafimaadka iyo daryeelka ama shakhsiyaadka la shaqeey dadka uu dhijitaalku ku cusub yahay.



Wadashaqaynta iyo waxqabadyada si loo faafiyo macluumaadka ku saabsan taageerada loo heli karo dadka uu dhijitaalku ku cusub yahay.